

KU SAABSAN BUUGA
Buuggani wuxuu kaa caawinayaa inaad naftaada dhisto, aad yeelato akhlaaq wanaagsan, aad maamusho waqtigaaga, aad ka gudubto dhibaatooyinka, una hanato guul ay ku barakaysan tahay noloshaada.
BUUGGAN WUXUU KA HADLAYAA:
Dhisidda Nafta
Aqoonta iyo Akhriska
Hadafka iyo Guusha
Akhlaaqda Suubban
Maareynta Waqtiga
Alle ka Cabsiga
Dhiirrigelinta Nafta
Nolosha Bulshada
“Naftaada maanta dhis, berrina noloshaada way kugu mahadcelin doontaa.”
ISBN 978-9915-33-001-0
9 789915 330010
DHIS NAFTAADA
FAADUMO AXMED NUUR
2026
وَمَنْ جَاهَدَ فَإِنَّمَا يُجَاهِدُ لِنَفْسِهِ
(العنكبوت)
DHIS
NAFTAADA
Buug ku saabsan horumarinta nafta, akhlaaqda, iyo gaadhista guul dhab ah.
2026
QORTAY
FAADUMO AXMED NUUR

بِــسْــــــمِ الــلَّـــهِ الـرَّحْمـٰنِ  الــرَّحِـــيــمِ.

# *DHIS NAFTAADA*

***Faadumo Axmed Nuur***

# Tusmada Buugga


**Afeef……………………………………………………….5**

**Hordhac…………………………………………………..6**

**Sababta qorista buugga………………………………..7**

**Hibayn……………………………………………………..8**

**Dhismaha Nafta……………………………………..13-14**

**Alle ka Cabsiga……………………………………….16-17**

**Tawbada…………………………………………….19-20**

**Qiimaha Nafta……………………………………..22-23**

**Maaraynta Waqtiga………………………………..25-26**

**Akhlaaqda Wanaagsan…………………………..28-29**

**Sabarka iyo Adkaysiga……………………………31-32**

**Mahadnaqa iyo Qanaacada……………………..34-35**

**Ka Fogaanshaha dib-udhiga iyo Caajiska….37-38**

**Yoolka iyo Qorshaynta Nolosha……………….40-41**

**Noqoshada Qof guulaystay…………………….43-44**

**Akhriska iyo kobcinta Maskaxda……………..46-47**

**Gunaanadka Buugga……………………………..49**

**Mahadnaq…………………………………………….50**

**Qormooyin  kooban……………………………….51**

# Afeef

**Buuggan yar ee dhis naftaadu waa dadaal yar oo aan ku soo ururiyay talooyin,dhiiri galin,iyo xikmado ku salaysan diinta islaamka.Iyo waayo-aragnimo aan ka soo guuriyay dadka wax garadka ah.**

**Ujeedaddayduna waa inaan ku dhiirigaliyo akhristaha inuu naftiisa dhiso,Alle uu u dhawaado,kuna dadaalo horumarka naftiisa.**

**Ma ihi qoraa xirfad leh.sidaa darteed haddaad ku aragto khalad xagga higaada,hab qoraalka buugga , ama habaynta bogga.**
**Waxaan si xushmad leh u codsanayaa wixii cudur-daar ah eed kala kulanto akhrinta buuggan,Markaana aad iisoo gudbiso sixitaanka.**
**Wixii aan saxay waa fadliga Alle,wixii aan khaldayna waxay ka ahaatay naftayda iyo shaydaan.**

**Waxaan Alle ka baryayaa inuu buuggan ka dhigo mid anfaco naftayda iyo dadka kalaba.**

____________________**Aamiin.**

# Hordhac

***Mahad iyo amaan oodhani waxay usugnaatay Alle* (swt),*Naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaato nabigeena muxamed*(*scw*).**

***Qofkasta wuxuu jecel yahay inuu helo nolol wanaagsan*,*qalbi dagan*,*iyo guul waarta*.*Sikastaba ha ahaatee*,*isbedelka dhabta ah wuxuu ka bilaabmaa qofka laftiisa*.*Marka uu hagaajiyo xiriirka kala dhexeeya rabbigii*,*akhlaaqdiisa*,*fikirkiisa iyo Camalkiisa*.*wuxuu qaadayaa tallaabadii u horaysay ee hormarka naftiisa*.**

***Buugggan dhis naftaadu waa buugg aad u kooban*. *wuxuuna kuu horseedayaa tallooyin*,*xasuusin*,*iyo inaad kobciso naftaada maskax ahaan*, *iyo dhiirigalin kaa caawinaysa sidaad u dhisi lahayd naftaada*.**

***Ujeedda buuggani Koobani maaha inuu bedello kutubta culimada*,*balse waa xasuusin iyo dhiirigalin qofka ku boorinaysa inuu naftiisa dib u eego*.*Uu kuna dadaalo wixii wax-tar uleh*,*kana fogaado wixii diintiisa iyo noloshiisa dhawacaya*.**

***Waxaan Alle waydiisanayaa inuu ka dhigo buuggan mid anfaca akhristayaasha*,*Aniga uu iinoqdo sadaqo*.**

***Aamiin*.**

# ***Sababta qorista buuggan***

***Sababta igu kaliftay inaan qoro buuggan "Dhis naftaada" waa rabitaan aan uqabo in naftayda iyo dadka kale si aan u xasuusiyo inay hagaajinta naftu ay tahay tallaabada kobaad ee horumarka nolosha.***

***Waxaan arkay in qofku uu rabo inuu wax ka bedello naftiisa, laakiin uu u baahan yahay in la xasuusiyo asbaabta lagu bedeli karo. Sidaa darteed waxaan doonay in aan isku keeno mawduucyo ka caawinaaya qofka inuu dhiso naftiisa.***

***Buuggan kaliya maaha qoraal aan dadka kale u qoray ee waa qormo  xasuusin u ah naftayda ugu horayn.Waxaan aaminsanahay in qof kastaa u baahan yahay dib u eegis  khaladkiisa si uu u saxo.***

***Waxaan rajaynayaa qofkasta oo akhriya buuggan yar inuu ka heli doono eray qalbigiisa taabta, tallo uu naftiisa uu ku hormarin karo,waano uu kaga tegi karo wax aan anfacayn Aduunka iyo aakhiraba, iyo dhiirigalin uu ku xoojin karo dhismaha naftiisa.***

***Ujeedadaydu waa inaan naftayda dhiso,dadka kalena aan ku dhiirigaliyo inay dhisaan naftooda.***

# ***Hibayn***

***Waxaan buuggan u hibaynayaa qofkasta oo doonaya inuu hagaajiyo naftiisa,dhiso akhlaaqdiisa,kordhiyo cilmigiisa,iyo inuu ku dadaalo u dhawaanshaha Alle.***

***Gaar ahaan waxaan u hibaynayaa gabadh kasta iyo wiilkasta oo ku haminaaya inay noqdaan kuwo wanaagsan oo akhlaaq iyo aqoon wanaagsan leh,oo noloshooda u qorshaystay si waa faqsan raali ahaansha Alle.***

- ***Buuggani ha noqdo xasuusin,tallaabo cusub oo aad ku dhisato naftaada.***

- ***Maanta dhiso naftaada si aad barri aad u hesho waxaad ku riyoonaysay.***

# ***Su,aal iyo Jawaab***

**~*Fahan guud ka qaado buugga*.**

### 1: ***Maxay tahay dhismaha naftu*?**

***Jawaab*: *Waa in qofku dhiso akhlaaqdiisa*,*aqoontiisa*,*cibaaddadiisa*, *iyo dhaqankiisa*, *uuna ku dadaalo inuu noqdo mid ka wanaagsan sidii shalay*.**

***Alle swt wuxu yidhi*:**

(قَدْ أَفْلَحَ مَن زَكَّاهَا ۝ وَقَدْ خَابَ مَن دَسَّاهَا)

"***Waxaa liibaanay qofka daahiraya naftiisa*,*Waxaa khasaaray qofka naftiisa aasay*]**
***Suuradda*: *Ash-shamsi* 9-10)**

### 2: ***Muxuu Alle ka cabsigu muhiim ugu yahay nolosha*?**

***Jawaab*: *Alle ka cabsigu wuxuu ka ilaaliyaa qofka dambiyada*,*Wuuna ku dhiirigaliyaa wanaag*,*Qalbigana wuxuu ku abuuraa mar walba inuu Alle xasuusto*.**

(إِنَّ أَكْرَمَكُمْ عِندَ اللَّهِ أَتْقَاكُمْ)

**"*Kan idunku karaamada badan Alle agtiisa*, *waa kan idiinku Alle ka cabsiga badan*.**
***Suuradda*: *Al-xujuraad*"13)**

### 3: ***Maxay tahay tawbadu,maxaase qofka ku kalifa inuu tawbadkeen*?**

***Jawaab*: *Waa in qofku dambigii ka dhacay uu ka qoomameeyo*,*Alle dambi dhaaf waydiisto*,*dibna uu ugu laaban*,*Go'aaana uu ka qaato inuu ka dhaco mar kale*.**

***Alle swt wuxuu yidhi*:**

(إِنَّ اللَّهَ يُحِبُّ التَّوَّابِينَ)

《 ***Alle wuxuu Jecelyahay kuwa toobadkeen ka badan*.Suuradda Al-Baqarah:222**
》

## 4: *Maxaa qofka ka caawiya inuu qiimeyo naftiisa*?

***Jawaab*:*Waa inuu qofku garto karaamada uu Alle siiyay,naftiisana uu ku dhiso iimaan*,*akhlaaq*,*aqoon*,*iyo xishood.Isaga oo aan naftiisa barbardhigin dadka kale*.**

***Alle swt wuxuu yidhi*:**

(وَلَقَدْ كَرَّمْنَا بَنِي آدَمَ)

(***Dhab ahaantii waxaan karamaynay ilmaha Aadan*:*Suuradda Al-israa*** 70)

## 5: *Maxay tahay sababta loo ilaaliyo waqtiga*?

***Jawaab*:** ***Waqtigu waa nimco Alle maahine cid kale ayna bixin karin*,*Wuxuuna adoomadisa siiyay waqti*,*si ay ugu qabsadaan dantooda*,*Aduun iyo aakhiraba*,*ku ku bixi waqtigaaga wax wax-tar leh*.**

## 6: *Maxay tahay akhlaaqda wanaagsan*,*Maxayse faa*"*iido leedahay*?

***Jawaab*:** ***Akhlaaqdu waa hantida ugu wanaagsan ee uu leeyahay qofku,waa hubka aad isku difaaci karto.waana astaan aad ku mutaysan karto raali ahaanshaha Rabbi*.**

## 7: *Sidee buu qofku uga gudbi karaa Caqabadaha nolosha*?

***Jawaab*:** ***wuxuu kaga gudbi karaa sabar*,*adkaysi*,*dadaal*, *duco iyo tala saarashada rabi*.*isaga oo aan ka quusan rajadiisa iyo naxarista Alle*.**

## 8: *Waa maxay sababta loo mahadnaqaa*?

***Jawaab*:** ***sababtoo ah qofka mahadnaqaa wuxuu qirayaa nimcada Alle*,*wuxuuna u isticmaala si Alle raali ka yahay*,*kadib wuxuu helaa siyaado*.**

***Alle swt wuxu yidhi*:**

***Haddii aad mahadnaqdan wan idin kordhin*.**

(*Suuratul ibrahim*:7)

## 9: *Waa maxay qanaacadu*?

***Jawaab*: *Qanaacadu waa astaanta qofka Alle aaminsan mar walba*,*wuxuu ku qancaa waxa Alle siiyay*,*wuxuna ka fogyahay xaasidnimada iyo hunguriyaynta waxa uuna haysan*.**

## 10:*Sidee akhrisku u kobciyaa maskaxda*?

***Jawaab*: *Akhrisku waa fure iftiimaya*,*wuxuu furayaa albaab wuxuna tirtiraa mugdiga maskaxda*,*wuxuu iftiin u yahay nolosha qofka*.**

## 11: *Maxay muhiim u tahay yool iyo qorshe in la sameeyo*?

***Jawaab*: *Yoolku wuxuu qofka tusayaa halka uu gaadhayo*,*qorshuhuna wuxuu tusyaa jidku ku gaadhi lahaa*.**

## 12: *Maxaa lagu gartaa qof doonaya inuu guulaysto*?

***Jawaab*: *waxaa lagu gartaa iimaan*,*yooll cad* ,*dadaal*,*sabar*,*joogtayn*,*iyo inuu Alle u dhiibto arimihiisa***

## 13: *Maxay tahay muhiimada ugu wayn ee dhismaha naftu*?

***Jawaab*: *Waa inuu noqdo qof Alle u dhaw mar walba*,*akhlaaq wanaagsan leh*,*aqoon fiican leh*,*waqtigiisa ilaashada*,*dadka anfaca*,*ka shaqeeya liibaanta aduunka iyo aakhiro*.**

***Alle swt wuxuu yidhi*:**

**﴿ وَمَن يُطِعِ اللَّهَ وَرَسُولَهُ فَقَدْ فَازَ فَوْزًا عَظِيمًا ﴾**

***Qofkii adeeca Alle iyo Rasuulkiisa*,*wuxuu gaaray guul wayn*.**
**(Al-Axzaab: 71)**

## 14: *Maxay Tahay Fariinta ugu wayn ee buugga* "*Dhis Naftaadu*"?

***Jawaab*: *Fariinta ugu wayni waa in isbedelka wanaagsani uu qofka ka bilaabmo naftiisa*.*Qofku waa inuu hagaajiyo xiriirka uu la leeyahay Rabbigiis*,*waqtigiisa akhlaaqdiisa*,*Hadafkiisa*.**
***Isagoo aan quusan markuu caqabad la kulmo*.**

***Alle wuxuu leeyahay*:**

**(إِنَّ اللَّهَ لَا يُغَيِّرُ مَا بِقَوْمٍ حَتَّىٰ يُغَيِّرُوا مَا بِأَنْفُسِهِمْ)**

***Alle ma badalo qoom ilaa ay iyagu bedelaan nafahooda*.**

# 1
# DHISMAHA NAFTA

# ***Dhisamaha nafta***

***Dhismaha naftu waa waxa ka dhigaaya qofka mid leh fikir wanaagsan,dabeecad,iyo hadaf toosan.Qofkasta wuxuu u baahan yahay inuu dhiso naftiisa,qoyskiisa,iyo bulshadiisa.Dhismaha naftu maaha wax lagu dhameeyo hal maalin, balse waa safar socdaal ah noloshaada.***

***Qofka raba inuu dhiso naftiisa mar ka hore waa inuu ogaada,meelaha uu ku fiican yahay iyo meelaha uu ku liito, Inaad is-aqoonsataa waxay kaa caawinaysaa inaad hesho jiho sax ah.***

***Waxaa ugu horeeya ee la dhisaana waa inaad xiriirka Alle aad hagaajiso.Salaada ilaaliso,Akhrido qur'aanka,iyo ducada aad badiso,waa inaad kaashato Alle mar walba.Arimahaasi Qalbiga waxay sii yaan daganaan iyo hanuun.***

***Noqo qof ku dhisan akhlaaq suuban,run sheeg,dulqaad,daganaasho,cafis, iyo ixtiraam.***
***Waxay kaa dhigaysaa midaasi qof ay bulshadu jeceshahay.***

***Maamul waqtigaaga.Waqtigu waa hantidaada kaliya eedna kaydsan karin.Haddii aad rabto inaad ka faa"iidaysato waqtigaaga qorshee Allena tala saaro.***

***La dagaallan caajiska iyo cabsida.Guushu waxay rabtaa dadaal,Sabar, iyo qorshe saxa.***
***Hana ka baqan khalad inuu ka dhaco,waayo wuxuu ka mid yahay wadadda guusha loo maro.***

***Yeello yooll cad qofka aan lahayn yool cad wuxuu la mid yahay qof safar ah oo aan garanayn meeshu ku socdo.Qor ahdaaftaada kuna dadaal inaad gaadho.***

***Dhisidda naftu waa masuuliyad qof walba saaran*.**
***Qofka maanta bilaaba isbedel dhaba wuxuu bari ka fiicnaan doonaa kii uu shalay ahaa*.**
***Ogsonaw*"*dhisamaha naftu inuu ka bilaabmo gudaha qofka*.**

- *HADDII AAD RABTO INAAD DUNIDA BADASHO,MARKA HORE NAFTAADA BADA*L.

# 2
# ALLE KA CABSIGA

# ***Alle ka cabsiga***

***Alle ka cabsigu*** (***Taqwada***) ***waa in qalbiga laga dareemo waynaanta Alle*** (***swt***) ***iyo Awoodiisa***, ***lagana fogaado wax kasta oo Alle inaga reebay***,***laguna dadaalo waxkasta oo uu ina faray***.***Cabsidda Alle maaha laab cidhiidhi***,***balse waa liibaanta labada daarood***.

***Alle ka cabsigu waa inuu addoonku ogaado inuu Alle arkaayo***,***maqlaayo***,***marwalba iyo meelwalba***.***Taasina waxay ku dhiirigalinaysaa inuu sameeyo wanaag***,***kana fogaafo xumaanta***.

***Qofka Alle kacabsadaa wuxuu helayaa***:

1. ***Qalbi dagan oo xasiloon***.
2. ***Hanuun iyo iftiinka nolosha***.
3. ***Inuu Alle ufudaydiyo arimihiisa***.
4. ***Abaal-marin wayn maalinta  aakhiro***.

***Alle ( swt) wuxuu yidhi***:

﴿وَمَن يَتَّقِ اللَّهَ يَجْعَل لَّهُ مَخْرَجًا ۝ وَيَرْزُقْهُ مِنْ حَيْثُ لَا يَحْتَسِبُ﴾ **(Surah At-Talaq: 2-3)**

***Macnaha***:
***Qofka Alle ka cabsada Alle wuxuu u yeelaa meel uu kaga baxo dhibka***,***wuxuuna ka arsaaqaa meel usan filayn***.”

***Waxay sababtaa cabsida Alle***:

.

1. ***In salaadda la ilaaliyo***.
2. ***In qur'aanka la akhriyo laguna camal falo***.
3. ***In la badiyo xuso ka Alle iyo ducadda***.
4. ***In akhlaaq suuban la yeeaho***.

***Saamayta Alle ka cabsiga***

***Qofka Alle ka cabsadda wuxuu noqdaa.mid daacad ah,dulqaad badan, dadka u naxariista  oo cafis badan,***
***Kana taxaddara hadallkiisa iyo ficillkiisa.***

***<u>Hal talo</u>: Samee camal joogto ah haba yaraadee,si aad Alle ugu dhawaato.***”

- ***Alle ka cabsigu waa quruxda qalbiga iyo guusha dhabta ah,Ruuxa Alle ka cabsa wuxuu helaaa barakada noloshiisa,wuxuu rajeeyaa mar walba raalli ahaanshaha Rabbigii.***

# 3
# TAWBADDA

# ***Tawbada***

***Tawbadu waa albaab wayn oo Alle u furay adoomadiisa si ay uga soo noqdaan dambiyada ay galeen,oo ay u helaan dambi dhaaf iyo Naxarista Alle.***
***Ma jiro qof aan gafin, laakiin ka ugu khayr ka badan waa kan qirta khaladkisa sidaacadana ugu noqda Rabbigiis.Tawbadu waxay nadifisaa qalbiga,waxayna u furtaa qofka albaab wanaagsan oo ka galo nolol wanaagsan.***

***Alle [swt] wuxuu yidhi:***

**[وَتُوبُوا إِلَى اللَّهِ جَمِيعًا أَيُّهَا الْمُؤْمِنُونَ لَعَلَّكُمْ تُفْلِحُونَ**
**Suurada An-Nuur..24:31]**

***Macnaha:***
***Dhamaantii utoobad keena Alle,mu'miniintay si aad u liibaantaan.***

*Waa maxay tawbadu?*

***Tawbadu waa in qofku ka tago dambiga,uu ka qoomameeyo wixii uu sameeyay, uu go'aansado inuuna dib ugu laaban dambigii, Una noqdo Alle isagoo rajaynaaya dambi dhaaf.***

***Alle {swt} wuxuu yidhi:***

**[إِنَّ اللَّهَ يُحِبُّ التَّوَّابِينَ وَيُحِبُّ الْمُتَطَهِّرِينَ]**
**Suurada Al-Baqarah (2:222)**

***Macnaha:***
***Alle wuxuu Jecel yahay kuwa toobad keenka badan, wuxuuna Jecel yahay kuwa isdahiriya.***

***Fadliga tawbada***

***Tawbadu waxay tirtirtaa dunuubta,qalbigana waxay ku beertaa xasilooni iyo rajo wanaagsan.Qofka tawbad keena wuxuu helaa jacaylka iyo Naxariista Alle.***

***Nabigu scw wuxuu yidhi:***

**«التَّائِبُ مِنَ الذَّنْبِ كَمَنْ لَا ذَنْبَ لَهُ»**
**Waxaa wariyey: Ibnu Maajah.**

***Macnaha:***
***Qofka toobad keena wuxuu lamid yahay qof aan lahayn dambi.***

***Shuruudaha tawbada*:**

1. ***In laga tago dambiga*.**

2. ***In laga qoomameeyo*.**

3. ***In la go'aansado in lagu noqon mar kale*.**

4. ***Haddii uu laxiriiro xuquuqda dadka dib loogu celiyo,raali galin laga bixiyo*.**

***Tawbadu waa nimco wayn oo Alle ugu deeqay adoomadiisa.Dib haw dhigin tawbad keenka,waayo qofna ma oga marka uu geeriyoon*.**
***Ku dadaal mar walba inaad Alle u noqoto,maxaayeelay Alle wuxu jecelyahay kuwa tawbad keenka badan,wuxuuna ka aqbalaa adoomadiisa tawbada dacada ah ee wanaagsan*.**

# 4
# QIIMAHA NAFTA

# ***Qiimaha nafta***

***Qofkasta wuxuu leeyahay qiime iyo karaamo uu Alle ku manaystay.Qiimaha naftu maaha muuqaal,hanti,iyo sida ay dadku kuu arkaan,balse waa iimaankaga intuu le'eg yahay,iyo sida ay naftaadu u dhisan tahay Cibaaddo ahaan,aqoon ahaan,iyo dhaqan ahaan.***

***Waa inaad ogaato qiimahaaga,Allena uu ku abuuray ujeedo wayn.Ha quusan,hana yaraysan awooddaada,waayo waxaad leedahay karti iyo hibooyin aad ku hormarin karto naftaada.***

***Ixtiraam naftaada qofka naftiisa xushmeeyana wuxuu ka fogaadaa wax kasta oo dhaawacaaya sharaftiisa iyo diintiisa.wuxuu doortaa goobo wanaagsan,hadallo iyo ficillo wanaagsan.***

***Qiimaha nafta waxa kordhiya inaad yeelato akhlaaq,aqoon,aad ku kala saarto xaqa iyo baadilka.***

***Qiimahaaga haku xidhin hadallka dadka, waayo dadku si wax uma wada arkaan.Ha u ogolaan inay dadku kaa qaadaan qiimahaaga,iyo kalsoonidaada,Alle ayaa og wax walba.***

***Naftaada u noqo saaxiib wanaagsan oo la sheekaysta la taliya,waaniya,ku dhiirigaliya wanaaga,Khaladkana ka cafiya.***

## ***Sida loo ilaasho qiiamaha nafta***

***Qiimaha nafta waxaad ku ilaalin kartaa Kalsoonida aad ku qabto Alle iyo naftaada.Waxaanad hoos ugu dhigi kartaa adiga oo xaqira qiimaha iyo karaamada uu Allah kugu manaystay.***

***Marwalba Alle ugu shukri cisiga iyo awoodda uu ku siiyay.***

## ***Ha isbarbar dhigin dadka kale***

***Qof walba Alle ayaa siiyay Awoodd iyo Fikir ugaar ah.***
***Isbarbardhiga faraha badan wuxuu keena kalsooni daro,niyad-jab,iyo in la iloobi nimcooyinka Alle.***

***Marnaba haku dhiiran inaad isbarbardhigto qof kale kaligaa ayaa wax walba qabsan kara qiimahaaga adiga ayuu gaar kuu yahay.Qiimaha qofkuna waa kolba sida uu u aqoonsado qiimihiisa.***

***Ogsoonaw: dadka inta badan kali  ayay ku yimaadeen  dunida,Kalina way kaga tagi doonaan.***

## *Naftaada horawmari*

***Maalin walba isku day inaad qabato ama aad barato wax cusub,akhlaaqdaada hagaajiso,cibaaddada wanaajiso,iyo inaad khaladkaaga saxdo.***

- ***Marka aad ogaato qiimahaaga waxaad bilaabaysaa inaad ilaaliso Sharaftaada,diintaada,waqtigaaga,akhlaaqdaada,iyo Mustaqbalkaaga.***

***Alle swt wuxuu leeyahay:***

(وَلَقَدْ كَرَّمْنَا بَنِي آدَمَ)

***《 Dhab ahaantii waxaan karaamaynay ilmaha Aadan 》***

# 5
# MAARAYNTA WAQTIGA

# ***Maaraynta waqtiga***

***Waqtigu waa nimco way oo Alle siiyay aadamaha.waa hanti aan la soo ceshan karin hadii ay ka tagto.Qofka garta qiimaha uu lee yahay waqtigiisu wuxuu ku dadaalaa hormarka naftiisa,diintiisa iyo aqoontiisa.***

***Ogow qiimaha waqtiga,waqtigu waa fursad uu Alle ina siiyo maalin kasta.Qofka caqliga leh wuxuu ka faa"iidaystaa sacadaha uu haysto,wuxuuna ka fogyahay waxa bilaa wax-tarka ah.***

***Samee qorshe maalinla ah, si aad u maamusho waqtigaaga,Cibadadda,waxabarashadda,shaqada, iyo Nasashada.***

***Ka fogaw waqti lumiska,waxaana ka mida mashquulka aan faa"idada lahayn,dib u dhigista hawlaha, wax yaabo badan oo dadka mashquuliya.***

***Kala hormari waxyaabaha muhiimka ah.Qof kasta oo guulaystay wuxuu si fiican u maamulay waqtigiisa.***
***Ha ku lumin waqtigaaga wax aanad ku gaadhayn yoollkaaga.***

***Waqtigaaga ku bixi wax kuu kordhinayaa Wax-tar,sida Salaadda,akhrinta qur'aanka,raadinta cilmiga,iyo Caawinta dadka.***

***Qofka waqtigiisa ilaaliyay wuxuu ilaaliyay noloshiisa,waa bog cusub ood ku dhisi karto mustaqbal iifaaya.Sidaa darteed,waqtigaaga maarayso oo ka dhig mid guul kuu horseeda aduun iyo aakhiraba.***

## *Maxaa luminaya waqtigaaga?*

***Dadka waxaa waqtiga ka lumiya inta badan isticmaalka xad-dhaaf ka ah ee telefoonka,Hadalka badan ee bilaa war-tar ka ah,hurdada xad-dhaaf ka ah,caajiska faraha badan.***

## *Sidee loo qaybiyaa maalinta?*

- ***Waqti cibaadda u gaar ah.***
- ***Waqti waxbarashada u gaar ah.***

- ***Waqti shaqada u gaar ah***.
- ***Waqti nasashada u gaar ah***.
- ***Waqti La sheekaysiga dad aad xiisaynayso u gaar ah***.

## *Waqtigu hadduu tago ma soo noqdaa*?

***Maya ma soo noqdo***.
***Lacag haday kaa lunto wad heli kartaa laakiin haddii ay hal daqiiqo kaa lunto dib uma heli kartid noloshaada***.
***Sidaa darteed qofka Caqliga saliimka ah lihi wuxuu ku faa*"*idaystaa waqtigiisa***.

***Nabiga scw wuxuu yidhi***:

«نِعْمَتَانِ مَغْبُونٌ فِيهِمَا كَثِيرٌ مِنَ النَّاسِ: الصِّحَّةُ وَالْفَرَاغُ»

**(*Laba nimco ayay dadka badankoodu ku khasaarayaan*:*Caafimaadka iyo Firaaqada*)**

***Alle haynaga  dhigo kuwa ka faa*"*idaysta waqtigooda***.

# 6
# AKHLAAQDA WANAAGSAN

# ***Akhlaaqda wanaagsan***

***Akhlaaqda wanaagsani waa quruxda dhabta ah ee qofka.Waxay turjumaysaa qofka iimaankiisa,dhaqankiisa,iyo sida uu dadka kale ula mucaamilo.Qof akhlaaqda wanaagsan leh wuxuu kasbadaa jacaylka iyo raalin ahaansha Alle (swt).***

***Nabigu (scw) wuxuu yidhi:***

قال رسول الله ﷺ: «أَثْقَلُ شَيْءٍ فِي الْمِيزَانِ حُسْنُ الْخُلُقِ»

***Macnaha:***

***Waxa ugu culus ee lagu miisaami miisaanka (malinka qiyaame) waa akhlaaqda wanaagsan.***

***Akhlaaqda wanaagsanina waa in qofku ku dhaqmo runta,daacadnimada,dulqaadka,naxariista, ixtiraamka,iyo Asturida ceebaha dadka kale.waa midka ka fog isku dirka,Xanta,iyo ceebaynta dadka.***

***Waxay kordhisaa Akhlaaqdu:***

1. ***Jacaylka iyo kalsoonida dadka.***
2. ***Xoojinta iimaanka qofka.***
3. ***Nabadgalyada is-afgaradka bulshada.***
4. ***Sidookale waxay sababtaa ajar wayn oo Alle agtiisa ah.***

***Waxaa laga helaa akhlaaq wanaaga:***

1. ***Raacida  Qur'aanka iyo sunada Nabiga scw.***
2. ***La saaxiibida dadka akhlaaqda suuban.***
3. ***Xakamaynta xanaaqaaga.***
4. ***Ka fogaanshaha af-lagaadada.***
5. ***Garashada wayniga Rabbi.***

6. ***Garasha adoonimada***.

7. ***Cafiska***,***iyo dulqaadka***.

***Calaamadaha qofka Akhlaaqda wanaagsan***:

1. ***Run badni***.
2. ***Amaano ilaalin***.
3. ***Ballan oofin***.
4. ***Sabarka***.
5. ***Naxariista***.
6. ***Daganaanta***.
7. ***Xishoodka***.
8. ***Ixtiraamida dadka***.
9. ***Caawimada dadka wuxu awooddo***.
10. ***Ka fogaanshaha been abuurka***.
11. ***Ka fogaanshaha xanta iyo isla waynida***.
12. ***Ka fogaanshaha dulmiga iyo isku dirka***.

***Akhlaaqda wanaagsan waa hanti aan duugoobin waligeed***.
***Waxay kor u qaadaa sharafta qofka aduunka korkiisa***,***Aakhirana waxay u culaysisaa miisaankiisa xasanaadka***.***Sidaa darteed aynu ku dadaalno in akhlaaqdeeno noqoto mid waafaqsan qur'aanka iyo sunada Nabigeena Muxamed*** (***NKH***)

# 7
# SABARKA IYO ADKAYSIGA

# ***Sabarka iyo Adkaysiga***

***Sabarku waa Akhlaaqda ugu qiimaha badan ee qofka muslimka ah.Waa awoodd qofku ugu dulqaato dhibaatooyinka,imtixaanada iyo caqabadaha nolosha,isaga oo Alle ku kalsoon. Adkaysigu waa inuu qofku ku sii socdaa jidka saxda ah,inkasta oo ay jiraan duruufo adag. Labaduba waa furaha guusha aduun iyo Aakhiro.***

***Alle (swt) wuxuu yidhi:***

**{يَا أَيُّهَا الَّذِينَ آمَنُوا اصْبِرُوا وَصَابِرُوا وَرَابِطُوا وَاتَّقُوا اللَّهَ لَعَلَّكُمْ تُفْلِحُون**
**Suurada: Al-Cimraan 3:200]**

***Macnaha:***
***Kuwa xaqa rumeeyow sabra,isku sabra,adkaysta,Alle ka cabsada si aad u liibaantaan.***

***Qiimaha sabarka***

***Sabarku wuxuu siiyaa qofka daganaan,Rajo,iyo awood uu kaga gudbo caqabadaha la soo darsa.Isaga oo aan quusanayn,ajarna dalbaaya.***

***Alle (swt) wuxuu yidhi:***

**[إِنَّ اللَّهَ مَعَ الصَّابِرِينَ]**
**Suurada: Al-Baqarah (2:153]**

***Macnaha:***
***Alle wxuu la jikooda yahay kuwa sabra.***

## ***Sabarka iyo Adkaysiga nolosha***

***Qofka sabra adkaysta ma quusto mar uu la kulmo dhibaato.Wuxuu ogyahay in culayskasta uu gadaashiisa ahaaday fudayd.Sidaa darteed, uu Alle u qadaray xikmad darteed.***

***Alle (swt) wuxuu yidhi:***

{فَإِنَّ مَعَ الْعُسْرِ يُسْرًا ۝ إِنَّ مَعَ الْعُسْرِ يُسْرًا }

**Suuradda: Ash-Sharx (94:5–6)**

***Macnaha*:**
***Hubaal dhib kasta waxa la socda fudayd.run ahaan dhib kasta waxa la socda fudayd*.**

***Rasuulku* (*scw*) *wuxuu yidhi*:**

«وَمَا أُعْطِيَ أَحَدٌ عَطَاءً خَيْرًا وَأَوْسَعَ مِنَ الصَّبْرِ»

***Macnaha*:**
***Qofna lama siin hiboka wanaagsan kana balaadhan sabarka*.**

***Sidoo kale Nabigu scw wuxuu yidhi*:**
«إِنَّمَا الصَّبْرُ عِنْدَ الصَّدْمَةِ الْأُولَى»

***Macnaha*:**
***Sabarka dhabtii waa marka u horayse ee ay kugu dhacdo dhibaatadu*.**

***Sabarka iyo adkaysigu waa laba sifo oo gaarsiiya qofka raali ahaansha Alle*,*iyo gargaakiisa*.*Haddii uu qofku helana wuxuu helay hanti wanaagsan*.**

***Ku dadaal sabarka marka aad dareento cidhiidhi*,*kaalaysana cibaadada*.**

# 8
# MAHADNAQA IYO QANAACADA

# ***Mahadnaqa iyo Qanaacada***

***Mahadnaqa iyo qanaacadu waa laba ka mid ah dhaqanka ugu qiimaha badan ee islaamku ku booriyay muslimiinta.Mahadnaqu waa in adoonku qirto nimcooyinka Alle siiyay Oo uu ku amaano carabkiisa.***

***Qanaacaduna waa in qofku raali ku noqdo wuxuu Alle u qadaray,isaga oo aan ku mashquulin waxa ay dadka kale haystaan.Labadan sifo waxay qofka u horseedaan nolol dagan oo aan lahayn walwal iyo warbahaar.***

***Allah swt wuxu leeyahay:***

**[لَئِن شَكَرْتُمْ لَأَزِيدَنَّكُمْ وَلَئِن كَفَرْتُمْ إِنَّ عَذَابِي لَشَدِيدٌ]**

**Suurada: Ibraahim (14:7)**

***Macnaha:***
***Haddii aad mahadnaqdan wan idin kordhin nimcooyinka,haddii aad gaalawdana,Cadaabkaygu waa daran yahay.***

## ***Mahanaqa Nimcooyinka Alle***

***Nimco kasta oo qofku haysto waxay ka timid xaga Alle.Sidaa darteed waxaa waajib ah in la mahadnaqo oo aan lagu caasin Alle deeqdiisa qurxoon.***

)فَاذْكُرُونِي أَذْكُرْكُمْ وَاشْكُرُوا لِي وَلَا تَكْفُرُونِ(

Suurada: Al-Baqarah (2:

***Macnaha:***
***Ixusa,ana waan idin xusi doonaa,hana iga gaaloobina.***

## ***Qanaacada iyo hantida dhabta***

[1] «لَيْسَ الْغِنَى عَنْ كَثْرَةِ الْعَرَضِ، وَلَكِنَّ الْغِنَى غِنَى النَّفْسِ»

***Macnaha:***

***Taanirnimadu maaha hanti badan**, **ee taajirnimada dhabtii waa qanacsanaanta nafta***.

***Sidookale wuxuu yidhi Nabigu Scw***:

«قَدْ أَفْلَحَ مَنْ أَسْلَمَ، وَرُزِقَ كَفَافًا، وَقَنَّعَهُ اللَّهُ بِمَا آتَاهُ»

***Macnaha***:
***Wuu liibanay qofka islaama**,**laguna arsaaqo wax filan***,
***Allena uu ka yeelay mid ku qanacsan waxa la siiyay***.

## *Faa”idooyinka Mahadnaqa iyo qanaacada*

1. ***Waxay kordhiyaan nimcooyinka Alle***.
2. ***Waxay qalbiga galiyaan daganaasho iyo farxad***.
3. ***Waxay ka fogeeyaan qofka xaasidnimada***.
4. ***Waxay xoojiyaan tawakkulka iyo kalsoonida nafta***.
5. ***Waxay qofka ka dhigaan midku nool nolol xasiloon***.

***Mahadnaqa iyo qanaacada waa hanti aan lacag lagu iibsan karin**.**Qofka Alle u mahadnaqa wuxuu haystaa qalbi dagan***.

# 9

# KA FOGAANSHAHA DIB-U DHIGA IYO CAAJISKA

# Ka Fogaanshaha  dib-u dhiga iyo Caajiska

***Caajiska iyo dib- udhigu waa laba arimood oo qofka ka hor istaagi kara horaw socodka.***

*Qofku wuxuu yeelan karaa himillooyin waawayn,Laakiin haddii uu yidhaa mar walba bari ayaan qaban doona"waxaa dhacda ah in uu waqtigiisa ka dhamaado asaga oo aan wali waxba qaban.*
*Sidaa dartee qofka doonaaya inuu dhiso naftiisa haka fogaado Caajiska iyo dib u dhiga.*

***Waa maxay dib-u dhigistu?***

*Waa hawl aad manta qaban karto oo aad si ula kac ah waqti dambe ugu riixdo,iyada oo ayna jirin wax cudur daar ah oo ku diidaya inaad hadda qabsto.*

## *Caajiska iyo saamayntiisa*

*Caajisku wuxuu qofka ka hor istaagaa waxbarashada,cibaadada,iyo Horumarinta naftiisa.*
*Qofka caajiska badani wuxuu qorsheeyaa Hawlo badan,balse wuxuu sameeyaa ficil yar.*

*Rasuulku scw wuxuu illahay ka magan gali jiray caajiska:*

«اللَّهُمَّ إِنِّي أَعُوذُ بِكَ مِنَ الْعَجْزِ وَالْكَسَلِ »

*Macnaha:*
*Illahaw waxaan kaa magan galayaa tamar-darada iyo caajiska.*

## *Sidee looga adkaan karaa dib-udhigista*

1. ***Samee qorshe cad.***

*Qor waxa aad rabto inaad qabato maalintaada kadibna kala hor mari muhiimadooda.*

2. ***Hawsha bilaw maanta*.**

*Ha sugin waqti "ku haboon" bilaw maanta xataa hadii ay yartay tamardaada gadaal waad ka awoodaysan doontaa*.

3. ***Ka fogaw waxa waqtiga kaa lumin kara*.**

*Ka fogaw waxa waqtiga lumiya inta badan,Sida telefoonka,sheekada aan waxtarka lahayn,iyo Caajiska, waxay kaa qaadan karaa waqti badan. Waqtiga aad wax qabanayso ku dadaal inaad ka fogaato wax yaabaha ku mashquuliya*.

4. ***Ku tababar joogtaynta naftaada*.**

*Horumarku kuma yimaad hal maalin.Wax yar oo aad malin walba joogtayso ayaa ka wanaagsan,wax badan oo aad hal maalin qabato*.

***Rasuulku*** scw ***wuxuu yidhi*:**

«أَحَبُّ الْأَعْمَالِ إِلَى اللَّهِ أَدْوَمُهَا وَإِنْ قَلَّ »

***Camallada Alle ugu Jecelyahay waa kuwa la joogteeyo haba yaraadaane*.**

*Dib-u dhigista iyo caajisku waa labada Caqabadood ee qofka ka hor istaaga himilladiisa,Laakiin waxaa difaac ka noqda Go'aan adag,dadaal joogto ah,Iyo tala saarashada Alle. Ha odhan barri ayaan bilaabi adiga oo maanta bilaabi kara.Tallaabada yar ee aad maanta qaado ayaa barri kuu horseedi karta Guul*.

***Dhis Naftaada,waqtigaaga ilaasho,Caajiska ka adkaw,Howshaadana maanta bilaw*.**

# 10
# YOOLKA IYO QORSHAYNTA NOLOSHA

# Yoolka iyo Qorshaynta Nolosha

***Nolosha qofku waxay u baahan tahay Jihayn iyo qorshe cad.Qofku haddii uuna lahayn yool cad wuxuu waqtigu kaga lumaa meeraysi asaga oo aan garanayn meesha uu usocdo. Qofka uu yoolkiisa iyo safarkiisu cad yahay, wuxuu ku farxaa Jirka uu u maraayo Meeshu ku socdo.***

***Qofka naftiisa dhisaaya waa inuu yeesho himillo wanaagsan,iyo dadaal muuqda.***

### *Waa maxay yool?*

***Yoolku waa wax aad si cad u doonayso inaad mustaqbalka gaadho.
Yoolku wuxuu noqon karaa raadinta barashada diinta,waxbarasho maadi,iyo akhlaaq wanaagsan ama horumar shaqsiyeed.***

***Alle scw wuxuu yidhi:***

(فَإِذَا عَزَمْتَ فَتَوَكَّلْ عَلَى اللَّهِ ﴾

***Macnaha: Markaad go'aansato,Alle tala saaro.***

***Aayadani waxay ina tusaysaa inan go'aanka ku darno tala saarashada rabbi.***

### *Muhiimada Qorshaynta*

***Qorshayntu waxay ka caawisaa qofka inuu si wanaagsan u isticmaalo waqtigiisa iyo Awoodiisa.
Marka aad qorshayso waxa aad qabanayso,Xiligaad qabanayso iyo sidaad u qabanayso si fudud ayaad ku dhamayn kartaa.***

***Qorshe la,aantuna waxay keentaa waqti lumis,iyo dib udhac,waxayna sababtaa inuu noqdo qof ku mid ku nool rajo bilaa ficil ah,Go'aan bilaa fulin ah.***

### *Sida loo dajiyo yool cad*

- ***Yeelo Yool sax ah***
- ***Qor Yoolkaaga***
- ***U kala qaybi tallaabooyin***

- ***U samee waqti cayiman***
- ***Ha ka quusan caqabadaha***

*Ha odhan oo kaliya "waxaan rabaa inan guulaysto" Go'aanso waxa aad rabto inaad gaadho.*

*Markaad qorto yoolkaaga waxaad mar walba xasuusanaysaa meesha aad u socoto.*

*Hal mar laguma gaadho yool wayn,U kala qaybi tallaabooyin yar yar oo joogtee.*

*Usamee yoolkaaga waqtiga aad rabto inaad gaadho,*
*Kadibna la soco horumarkaaga.*

*Haddii aad la kulanto caqabad ama aad khaldanto haw qaban in wax walba dhamaadeen. Sax khaladka dibna u bilaw.*

***Hal tallo***
***Ogow**: Qorshaynta macnaheedu maaha in qofku isku haleeyo awoodiisa oo kaliya.Muslimku Alle ayuu tala saartaa kidibna wuxuu la yimaad asbaab iyo dadaal.*

***Rasulku scw wuxuu yidhi**:*

**[ *Ku dadaal wixii ku anfaca,Allena kaalmo waydiiso,hana ka caajisin*]**

***Xadiiskani**" wuxuu isku darayaa sadex arimood,Dadaal,Kaalmo waydiisasho Rabbi,iyo in aan laga caajis wixii wax tarleh.*

***Yeelo yool iyo qorshe wanaagsan.***
*Waxay kaa caawinayaan inaad jihayso noloshaada. Ha noqon qof ay iska fhaafaan maalmuhu isaga oo aan ogayn meeshuu usocdo.*
*Daji yool cad,Qorshee qorshe wanaagsan oo aad ku gaadhi karto,Dadaal,Sabar,Allena tala saaro.*

***Xasuuso**: Yoolkaaga,Qorshaha samee,Dadaalka joogteeXiriirka Alle ku dadaal.**waa jid wanaagsan oo guusha loo maro.***

# 11

# *NOQOSHADA QOF GUULAYSTAY*

# ***Noqoshada qof guulaystay***

***Qofkastaa wuxuu jecelyahay inuu guulaysto, laakiin guushu kuma timaad nasiib ama fadhi,waxay u bahan tahay dadaalka iyo dulqaad,qorshe iyo kalsoonida Alle. Guusha dhabtii waa tan qofka u horseeda raali ahaanshaha Alle, aduunkana farxad,Aakhirana liibaan.***

***Guushu waxay ka bilaab mataa himillo cad***

***Qofka guulaystay wuxuu leeyahay yooll cad oo uu doonaayo inuu gaadho,wuxuu qorsheeyaa noloshiisa,waqtigiisana si wanaagsan buu uga faa"idaystaa.***

***Alle (swt) wuxu yidhi:***

**(فَإِذَا عَزَمْتَ فَتَوَكَّلْ عَلَى اللَّهِ)**
**(Suuradda: Al-Cimraan (3:159**

***Macnaha:***

***Marka aad go'aansato,Alle talasaaro.***

## ***Dadaal iyo Sabar***

***Guul kasta waxaa ka horeeya dadaal iyo sabir.Qofka guulaystay kama quusto qacabadaha.basle wuxuu bartaa casharo.***

***Rasuulku scw wuxuu yidhi:***

**«احْرِصْ عَلَى مَا يَنْفَعُكَ، وَاسْتَعِنْ بِاللَّهِ، وَلَا تَعْجِزْ»**
**Waxaa wariyey: Muslim.**

***Macnaha:***
***Ku dadaal wixii ku anfacaaya,Allena tala saaro,hana ka caajisin.***

## ***Akhlaaqda iyo Daacadnimada***

***Guusha dhabtii waxay ku xidhantahay akhlaaqda wanaagsan iyo daacadnimada.Qofka runta sheega cadaaladna sameeya, ballantana oofiya,wuxuu kasbadaa kalsoonida dadka iyo raali ahaanshaha Alle.***

## *Ha ka quusan Rajada Alle*

***Mararka qaar waad fashilmi kartaa*,*balse fashilku maahin dhamaadka jidka*.*Waa fursad lagu saxo khaladaadka*,*laguna bilaabo wada cusub*.**

***Alle swt wuxu yidhi*:**

{وَلَا تَيْأَسُوا مِنْ رَوْحِ اللَّهِ)
Suuradda: Yuusuf (12:87)

***Macnaha*:**
***Haka quusanina naxariista Alle*.**

***Noqoshada qof guulaystay*:**
***Waxay u baahan tahay dadaal*,*sabir*,*tawakkal*. *Qofka guulaystay waa midka ku kalsoon Rabbigii*,*dadaalna muujiya*,*Kana faa"idaysta waqtigiisa*,*wuxuu gaadhi karaa guul wayn aduun iyo aakhiraba*.**

***<u>Tallo yar</u>*.**

***Manta bilaw tallaabada ugu horaysa ee guusha*,*kuna kalsoonaw inuu Alle u gargaaro qofka dadaala*.**

√ ***Si aad u guulaysato waxaad u bahan dadaal iyo dulqaad*.**

# 12
# AKHRISKA IYO KOBCINTA MASKAXDA

# Akhriska iyo Kobcinta maskaxda

*Akhrisku waa furaha aqoonta,halka ay tahay kobcinta maskaxduna jidka hormarkiyo guusha. Diinta islaamku waxay si wayn u dhiirigalisay raadinta cimiga,Waayo aqoontu waxay iifisaa qalbiga maskaxdana way kobcisaa,Qofkana waxay ka caawisaa inuu kala garto xaqa iyo baadilka.*
*Qofka caadaysta malinkasta inuu wax Akhriyo hal sadarna ha ahaatee wuxu noqdaa mid ka aqoon badan sidii shalay uu ahaa.*

***Alle (Stw) Wuxu yidhi:***

**(*Akhri magaca Rabbigaa ee abuuray makhluuqa*).**

## Akhrisku waa furaha guusha

*Akhrintu waxay ballaadhisaa fikirka qofka,Kordhiyaa aqoontiisa iyo xikmadiisa,wuxuu ka caawiyaa inuu kamid noqdo dadka wax-garadka ee waayo-Aragnimada leh.*
*Akhriska wanaagsani waxa laga helaa aragti fog iyo faham qoto dheer.*

***Alle (swt) wuxu yidhi:***

(وَقُلْ رَبِّ زِدْنِي عِلْمًا)

***Macnaha: "Dheh"Rabbiyaw ii siyaadi cilmi.***
*Suuradda:Taa Haa* (114).

## Sidee loo kobciyaa maskaxda

*Maskaxdu waxay u baahan tahay quudin joogto ah.*

***Ku Quudi Arimahan:***

1. ***Akhriska Qur'aanka iyo Tafsiirkiisa.***
2. ***Barashada Axaadiista Nabiga scw.***
3. ***Akhriska Buugganta faa"iidada Leh.***

4. ***Ka fiirsashada dadka aqoonta leh.***

5. ***Ka Faa"idaysiga waqtiga waxbarashada.***

***Nabiga scw wuxuu yidhi:***

«مَنْ سَلَكَ طَرِيقًا يَلْتَمِسُ فِيهِ عِلْمًا، سَهَّلَ اللَّهُ لَهُ بِهِ طَرِيقًا إِلَى الْجَنَّةِ»

***Macnaha:***
***Qofkii qaada jid uu ku raadinaayo cilmiga,Alle wuxuu u fudaydiyaa Jidka Janada.***

## ***Faa"idooyinka wax Akhriska***

***Wuxuu kordhiyaa aqoonta iyo fahamka***
***Wuxuu kobciyaa xasuusta iyo fikirka.***
***Wuxuu dhisaa kalsoonida nafta.***
***Wuxuu horseed u yahay barasha diiniga iyo maadiga.***
***Waxaa lagu bartaa waayo-aragnimo cusub.***

*Nabiga scw wuxu yidhi:*

***Qofkii uu illahay khayr ladoono wuxu fahamsiiyaa diinta.***

***Akhrisku waa hanti aan dhamaanayn. Qofka malinkasta wax akhriyaa wuxuu helaaa aqoon,cusub,faham cusub,Fikir cusub,iyo Isbedel cusub.Wuxuuna ka faa"idaystaa diintiisa iyo noloshiisa.***
***Sidaa darteed ka dhig akhriska saaxiibkaaga joogtada ah. Kuna dadaal raadinta cilmi wax-tarleh,Sobobtoo ah cilmigu waa iftiinka Labada daarood.***

- ***Wax la akhriyana Qur'aanka ugu macaan,igu Qurux badan,iguna Faa"iido badan Aduun iyo Aakhiraba.***

# ***Gunaanadka Buugga***

*Buuggan "**Dhis Naftaada**" wuxuu ahaa isku day aan ku doonaayay inaan ku xasuusiyo naftayda iyo walahayga muslimiinta ah Muhiimada ay leedahay qofku inuu naftiisa dhiso,Qalbigiisana hagaajiyo,Kana shaqeeyo siduu u noqon lahaa mid ka wanaagsan siduu shalay ahaa.*

*Waxaan kasoo hadalnay, Alle ka cabsiga,Tawbada,Qiimaha nafta,Maaraynta waqtiga,Akhlaaqda wanagsan,Sabarka iyo adkaysiga,Mahadnaqa iyo Qanacada,iyo mawduucyo kale.Dhamaan waxay kaa Caawinayaa dhismaha naftaada,Aqoontaada,Akhlaaqdaada iyo Hormarkaaga.*

*Maaha dhisida Naftaadu wax hal maalin ku dhismaaya,ee waa safar dheer.*
*Waa isbedel u imaanaya si socdaal ah.*
*Ku dadaal inaad samayso is bedel fiican.*

***Alle swt wuxu yidhi**:*

﴿ إِنَّ اللَّهَ لَا يُغَيِّرُ مَا بِقَوْمٍ حَتَّىٰ يُغَيِّرُوا مَا بِأَنْفُسِهِمْ ﴾
**Suurada Ar-Racdi (13:11)**

***Macnaha**:*
***illahay ma bedelo qoom ilaa ay iyagu wax ku jira nafahooda ay bedelaan.***

*Ayaadani waxay ina baraysaa isbedelka wanaagsani inuu ka bilaabmo gudaha qofka.Haddii aad rabto nolol wanaagsan ka bilaw isbedelka naftaada.*

*Ha sugin in noloshaadu iskeed isku bedesho,Adigu bilow isbedelka dhabta ah.*

*Maanta dhis naftaada,barrina noqo mid ka wanaagsan kii shalay uu ahaa.*

***Ugu dambayn waxaan rajaynayaa inuu buuggan "Dhis Naftaada" uu noqdo mid ku dhiirigaliya akhristaha dhismaha sax da ah ee naftiisa.***

***Allah** hayna waafajiyo Jidka saxda ah ee uu raali ka yahay.Aamiin.*

# ***Mahadnaq***

***Mahad oo dhan waxaa iska leh Alle oo iisurto galiyay qorista buuggan yar ee "dhis naftaada".***
***Waxaan umahad celinayaa Allah oo igu galaday islaamnimo,Caafimaad,Cilmi iyo Fursada aan ku qoray Erayadan.***

***Waxaan rajaynayaa in qormadani noqoto mid naftayda iyo dadka kaleba anfac u yeelata.***

***Sidoo kale waxaan u mahad celinayaa waalidkay iyo macalimiintyada qiimaha badan oo qayb wayn ka ahaa inaan wax barto,haddii aan waxba garan lahayna ma noqdeen qoraha buuggan yar.***

***Mahad gaar ah waxaan u jeedinayaa qof walba oo dhiirigalin igu siiyay inaan qoro,qofkasta oo ii rajeeyay guul,Iga caawiyay tallo,fikir,iyo erayo wanaagsan.Dhiirigalintaasi waxay ii ahayd awood iyo firfir cooni aan ku sii wado dadaalka.***

***Sidookale waxaan u mahadcelinayaa akhristaha qaaliga ah ee buuggan akhrin doona.Waxaan rajaynayaa in bog kasta ood akhrido uu  noqdo mid kuu kordhiya xasuusin,waano,dhiirigalin,iyo isbedel dhab ah hal kalmadna ha ahaate.***

***Waxaan Alle wayne waydiisanayaa inuu ka dhigo buuggga mid anfacaad u leh nafaheena ,cimigeena Niyadeena iyo Camalkeena.***

《 اللَّهُمَّ اجْعَلْ هَذَا الْعَمَلَ خَالِصًا لِوَجْهِكَ، وَبَارِكْ فِيهِ، وَانْفَعْ بِهِ مَنْ قَرَأَهُ 》

***"Illahay camalkan  ka dhigo mid adiga dartaa loo sameeyay,Ku barakee oo Ku anfac qofka akhriya.***

# Qormooyin kooban

1- *Noloshu ma ah waxa kugu dhaca oo kaliya*,*balse waa sida aad uga jawaabto waxa ka dhacaaya*.

2- ***Ha** ka murugoon wax kaa tagay*,*waxa laga yaabaa in ay ka khayr badan yihiin waxa imaandoona*.

3- *Qofka sabra waxa umuuqda*,*wax aan umuuqan ka degdega*,*marwalba joogtee sabarka*.

4- *Mararka qaar haddii uu albaab kaa xidhmo maaha dhamaadka rajadaada*,*balse waa bilawga mid ka wanaagsan*.

5- *Haku lumin noloshaada la tartarka dadka*,*la tartan naftaada shalay say ahayd*,*siday manta tahay*,*siday barri noqon lahayd*.

6- *Qof walba wuxuu lee yahay cadaw aan la arkin*,*sidaa darteed isku day inaad ka adkaato*.

7- *Wax kasta oo aad nolosha la kulanto ka qaado cashar bari aad kaga gudbi karto imtixaanka nolosha*.

8- ***Q**anaacada joogtee waxay Jidhka ka degtaa qalbiga*,*si uu jidhka kale u helo awood iyo farxad*.

9- ***H**a ka baqanin waligaa inaad samayso bilaw cusub*,*geedka wayniba mar buu ahaa iniin yar*.

10- ***Og**soonaw waqtiga kaa lumay dib uma heli kartid*,*laakiin kagugu soo wajahan waad ka faa*”*idaysan kartaa*.

**11-** ***Qofk naftiisa edbiya ayaa ka xoog badan ka dadka kale edbiya*.**

**12-** ***Haddii aad manta bilawdo dhismo yar ood joogtayso sanado kadib waxad arki dhamaystir qurux badan*.**

**13-** ***Qofka wanaagsani wuxuu reebaa raad wanaagsan*,*markuu joogo*888*o*9 *waa la qadariyaa*,*marku maqan yahayna wanaag baa lagu xasuustaa*.**

**14-** ***Noloshu waa safar gaaban ee haku mashquulin*,*xasuuso meeshaad u socoto*(*Aakhiro*).**

**15-** ***Nolosha ugu quruxda badan*,*ugu xasiloon*,*ugu farxada badan*, *waa mida Alle aad ku raaligalisay*.**

***Halkan ku Qor wixii aad ka faa"iday akhriska buuggan*.**

***Alxamdulillah" Allah ayaa ku mahadsan dhamaystirka Qormada buugga*.**

***Akhristaha dhamaystiray akhriska wuu mahadsan yahay*.**

***La xidhiidh qoraaga***

***Haddii aad hayso Fikrad*,*talo*,*su*,*aal iwm*."**

***Faadumo Axmed Nuur***

📱 **WhatsApp:**
**+252 63 723 8050**


DHIS
NAFTAADA
Buuggani wuxuu ku hagtayaa sidii aad u dhisi lahayd naftaada, u xoojin lahayd iimaankaaga, u maamuli lahayd waqtigaaga, ugana gudbi lahayd caqabadaha nolosha.
AAYAD
وَأَن لَّيۡسَ لِلۡإِنسَانِ إِلَّا مَا سَعَىٰ
"Qofku ma helayo wax aan ahayn wixii uu u dadaalay."
(Suuradda An-Najm: 39)
DHIIRIGELIN
Ha quusan. Maalin kasta tallaabo yar oo wanaagsan qaad. Dadaalka joogtada ahi waa furaha guusha, halka tawakkulka Alle uu yahay iftiinka jidkaaga.
QORAA:
Faadumo Axmed Nuur